


Jamhuuriyadda Somaliland
Xafiiska XeerIlaalinta Guud ee Qaranka JSL.

XIG/JSL/363/2021.

09/12/2021
Hargeysa.

- Ku:- Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda JSL
Hargeysa.
Og:- Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka M/Jeex
Hargeysa
Og:- Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee JSL.
Hargeysa.

Ujeeddo:- Jawaab Celin Qoraal.

Anigoo tixraacaya qoraalkaaga sumadiisu tahay GW/G/09/279/2021, ee 01/12/2021, kuna saabsanaa caddeyn la xidhiidha Dacwadda loo haysto Eeddeysane Cabdimaalik Muuse Coldoon.

Haddaba, waxaan kula socodsiinayaa in Eeda loo haysto Eeddeysanaha sare ku xusan ee la xidhiidha Golaha Wakiilada uu Qaranku Dhibane ka yahay; waxaana oogista Dacwadaasi u xil saaran Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka. Ma aha Dacwadani Dacwadaha ku xidhan dhaqaajinta Dalabka Dhibanaha sida uu tilmaamayo Qodobka 81aad Xeerka Ciqaabta Guud oo lala akhriyo Qodobka 21aad ee Xeerka Habka Ciqaabta.

Sidoo kale, waxaa reeban Dacwadaha ka socda Maxkamaddaha in la soo farageliyo inta go'aan Cadaalad ah laga gaadhayo.

Sidaasi darteed, waxaan soo jeedinayaa in lagu ixtiraamo Hay'ad kasta gudashada waajibaadkeeda sharci.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)
Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

